

Waaxda caabuqa

19.9.2024

Isnadaamis/Cuncun

Isnadaamisku waa finan cuncun leh, kuwaas oo uu cayayaan deriskunnoor ahi keeno. Maqaarka inta badan waxaa ka soo baxa finan, nabro biyo leh iyo calaamadaha xoqida. Isnidaamisku wuxuu caadi ahaan inta badan habeenkii keena cuncun ah gacmaha, kilki looyinka iyo agagaarka xubnaha taranka.

Faafitaanka

Isnadaamiska waxaa lagu faafin karaa maqaarka oo is taabta, dharka iyo gogosha sariirta in la isaga gudbiyo. Isnadaamiska inta badan si fudud looma kala qaado, ee qaadsiintu waxa kaliya oo ay baahan tahay in jirku si ku noqnoqosho leh isu taabto ama maqaarku xiriir dhow yeesho.

Calaamadahiisuna waxay bilowdaan 3-6 todobaad qaadista ka dib. Calaamadaha dib u soo laabashadiisuna waxay mar kale ku bilaami karaan dhowr maalmood gudahood.

Haddii qofka ay ka soo muuqdaan calaamadaha lagu yaqaan isnadaamiska, daaweyntiisa waxaa lagu bilaabi karaa iyadoo aan dhakhtar loo tagin. Daryeelka caafimaadka waxaa lala xiriirayaa, haddii aan la hubin in uu isnadaamis yahay ama isnadaamiska looga shakisan yahay ilmo 2 sano ka yar, hooyo uur leh ama nuujineysa.

Daaweynta

Isnadaamiska waxaa marka ugu horeysa lagu daweeyaa daawo aan dhakhtar qorin oo farmasiga laga iibsan karo oo ah boomaato la marsado lana yiraahdo **bentsylibentsoaatti**. Cidiyaha waa la gaagaabiyyaa. Boomaatada maqaarka oo qalalan, nadiif ah oo qabow ayaa la mariyaa. Boomaatada maqaarka oo dhan waa la marinayaa, sidoo kale qoorta, dhegaha gadaashooda iyo timaha guntooda. Wajiga looma baahna in la mariyo, haddii aan wajiga waxba ka muuqan. Waa in si khaas ah looga taxadaraa lana raacaa in boomaatada la mariyo faraha gacanta, faraha lugta dhexdooda, cidiyaha geesahooda, dhudhumada, calaacalaha/ baabacaha, cagta hoose, dusha xubinta taranka iyo barida. Boomaatada waa inaad ka ilaalisid afka iyo indhaha agagaarkooda. Hadii ay dhacdo in markaad daawada marsato ka dib aad ku khasbanaato inaad gacmaha dhaqdid, boomaatada mar kale ayaad hadana gacmaha marineysaa. Boomaatada maqaarka waad ku deyneysaa si uu ula falgalo habeenkii oo dhan, ugu yaraan 24 saacadood, markaas ka dibna waa la dhaqayaa.

Waxaa sidoo kale lagu daaweyn karaa **boomaatada permethrini**. Daawaynta waxaa loo fuliyaa si la mid ah sida bentsylibentsoaatti, laakiin wakhtiga saameyntu waa habeenkii oo dhan, ugu yaraan 12 saacadood, ka dibna waa la dhaqaa.

Xaaladaha qaarkood isnadaamiska waxaa sidoo kale lagu daaweyn karaa kiniini afka laga qaato oo la yiraahdo **Ivermektiini** in dhakhtar qorona u baahan.

Dadka guriga wada dagan (xataa kuwa aan calaamadaha lahayn) iyo kuwa kale oo ay taabashada maqaarkoodu soo noqnoqoto ama shaqsyaadka xiriir dhow ee maqaar ka

Waaxda caabuqa

19.9.2024

dhexeeyo, waxay noqoneysaa in isku mar laga wada daweeyo. **Dhammaantoodna waxay ku celinayaan isla daaweyntaas 7- 10 maal mood ka dib.**

Daaweynta ka dib maalinta xigta

- Joodariyaasha/firaashka, qalabka guriga iyo roogagaba waa la huufareynayaa
- waana la layrinayaa ama la huufareyaa bustayaasha iyo barkimooyinka
- gogosha sariirta waa laga badelaa iyo dhammaan dharka oo dhana, xataa dharka aad korka ka qabtey sida jaakadaha iyo Gacmo gashiyada/galoofisyada
 - dharka aad isticmaashay iyo dharka sariirta kuugu goglanba waxaa lagu dhaqaa 60 digrii ama waxaad ku xireysaa bac oo muddo todobaad ah ayaad qaboojiyaha qeypta barafka ku hayneysaa ama banaanka ayaad dhigaysaa markuu qabooowgu yahay ugu yaraan - 20 digrii mudo afar iyo labaatan saac ah.

Nadaafad ahaan waxaa kuugu filan nadaafada todobaadka la sameeyo ee caadiga ah (qolalka huufareyntooda iyo meelaha dushooda iyo sidoo kale musqulaha albaabada gacanta laga furo iyo qasabadaha biyaha oo si taxadir leh loo tirtiro). Nadaafada waxaa loo isticmaalayaa gacma gashiga hal mar isticmaalka ka dib la iska tuuro. Nadiifinta waxaa lagu celiyaa daaweynta labaad.

Faafitaanka waxaa la wargelinayaa kuwa uu maqaarkoodu is gaarey, carruurta goobta xanaanada ama iskuulka. Xanaanada ama iskuulka waxaa lagu laaban karaa, marka daawada jirka marsaneyd 12 saacadood ama 24 saacadood layska dhaqo ama maalinta ku xigta qaadashada kiininiga, iyada oo ay hadba ku xiran daawada boomaatada nooceeda.

Daaweynta ka dib cuncunku wuu sii jiri karaa 2- 4 todobaad, daaweyntiisana waxaa loo isticmaali karaa boomaatada kortisonka ah. Haddii cuncunku uu kugu sii dheeraado waxaa haboon inaad daryeelka caafimaadka la xiriirto.

Tilmaamo dheeraad ah THL:ka bogooda [Syyhy- THL](#) iyo [Terveyskirjastosta Syyhy \(scabies\) - Terveyskirjasto](#)

Fiiri sidoo kale Terveyskirjastoda, caabuqyada iyo xanaanooyinka
<https://www.terveyskirjasto.fi/dlk01200>